

Gacaliye Waalidka/Ilaaliyaha,

Sannad dugsiiyeedkaan, dugsiga dagmada cunugaada wuxuu sharaako la noqday Regional Arts & Culture Council (Guddiga Fanka iyo Hiddaha Gobolka) si fanka loo geliyo gudaha fasalka, taasoo loo adeegsado *The Right Brain Initiative (Qorshaha Maskaxda Midig)*. Sida qeyb ka tirsan barnaamijkaan, waxaan rabnaa in aan soo aruurino kambiyoone ku saabsan shaqada ardayga iyo in aan sawiro ka qaadno ardayda iyaga oo ka qeybgala.

Waxaan ku weysiisaneynaa in aad u ogolaatid cunugaada iyo shaqada fanka cunugaada in lagu soo bandhigo cilmi baaristaan iyo warqadahaan. Waxaan aaminsanahay in tani tahay fursad ay caruurta ku soo jeediyaan hal abuurkooda, ka fakaraan habka hal abuurkooda, iyo in ay kula qeybsadaan *adiga* iyo bulshada shaqada adag ee ka socota dugsigooda.

Fadlan ka fakar ***The Right Brain Initiative Documentation and Privacy Policies (Warqadaha Qorshaha Maskaxda Midig iyo Siyaasada Astumaanta):***

- Kambiyoona shaqada cunugaada waxaa loo adeegsan doonaa in lagu qiimeeyo barnaamijka, ee ma aha in lagu qiimeeyo cunugaada, qof ahaan.
- Dhamaan sawirada ardayda la soo qaado iyo kambiyooneyaasha shaqadooda waxaa loogu talagalay in lagu muujiyo oo keliya koriimada *wanaagsan*, waxbarashada, iyo hal abuurka xariirka iyo ujeedooyinka waxbarashada, iyo si loo horumariyo waxbarashada fanka dugsiyada.
- Tusaalooyinka ku saabsan sida loo isticmaali doono shaqada iyo sawirka cunugaada waxaa ka mid ah, balse kuma eka: bogga internetka The Right Brain (Maskaxda Midig), bandhigyada dadweynaha deegaanka (agagaarka Portland), kullamada loo qabto tababareyaasha, warbixinta horumarka la siiyo maal geliyeyaasha, iyo buugaagta xariirka - si loo qeybsado sida The Right Brain Initiative (Qorshaha Maskaxda Midig) u saameysay ardayda, macalimiinta, fanaaniinta, iyo dugsiyada ka qeybgalay.
- *Lama* isticmaali doono magaca buuxa cunugaada meelaha dadweynaha.
- Sawirada iyo kambiyoona shaqada *mama lama* iibin doono mana lala qeybsan doono in ay isticmaalaan urur ama qof kale.
- Go'aankaada xaajadaan si xun *uma* saamayn doonto waayaha waxbarashada cunugaada.
- Waa la soo aruurin doonaa dhamaan warqadaha, waxayna hoos imaan doonaan kormeerka shaqaalaha dugsiga.
- Ogolaashadaada kaddib, cunugaada waxaa loo ogolaan doonaa in uu ka baxo hawlaha Right Brain (Maskaxda Midig) waqti kasta.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan warqadaha iyo cilmi baarista, fadlan wac Sinéad Kimbrell, telefoonka 503.823.5014. ***Haddii aadan qabin su'aalo, fadlan dhamaystir kaddibna saxiix foomka ogolaashada hoose, kuna soo celi macalinka cunugaada muddo hal todobaad gudaheeda.*** Waxaan ku faraxsanahay taageeradaada iyo waxaan rajeyneynaa in aan wax ka barano cunugaada.

Mahadsanid,



Sinéad Kimbrell, Program Manager, The Right Brain Initiative
skimbrell@TheRightBrainInitiative.org

Waalidka/Ilaaliyaha: Fadlan dooro hal talo, kaddibna dhamaystir dhamaan foomka macluumaadka hoose, kaddibna ku soo celi macalinka ***muddo hal todobaad gudaheeda:***

HAA Aniga waan akhristay iyo waan fahamsanahay *The Right Brain Initiative Documentation and Privacy Policies* iyo **Aniga waxaan rugsad ka bixiyay** kambiyoona shaqada cunugeyga (qoraal, muuqaal, iyo duuban) iyo sawirka loo isticmaali doono *The Right Brain (Maskaxda Midig)* qorshaha ujeedooyinka waxbarashada iyo xariirinta.

MAYA **Aniga ma bixiyin in ogolaasho** in la isticmaalo sawirka cunugeyga ama in la isticmaalo kambiyoona shaqada uu qabtay.

Magaca Ardayga: _____ Darajada: _____

Dugsiga: _____ Macalinka: _____

Magaca Waalidka/Ilaaliyaha: _____ Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha: _____